



PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

REOPEN

Xusuusin ku Saabsan Qoysaska ee Jadwalka PK-5

Maarso 29- Abriil 2

Maarso 25, 2021

Qoysaska Qaaliga ee PK-5,

Waxaan idiin rajeyneynaa inaad ku raaxeyaneynaa idinka nasanaya oo nabada fasaxa gu'ga, iyo waliba ku faraxsanay daah-furida qaabka waxbarashada iskudhafan ee iskuulada ardaydu ku qaadanayaan bisha Abriil. Sidaas darteed waxaan jecelnahay inaad idin xasuusino jadwalka waxbarashada ee todobaadka soo socda.

Ka gadaal fasaxa gu'ga:

- **Ardayda Xannaanada Waqtiga Hore (PreK), Xannaanada (kindergarten), iyo fasalka 1aad waxa ay qaadan doonaa waxbarashada online ee ardaygu gurigooda ku qaadanay bisha Maarso 29 ilaa 31,** ka dib waxa ay bilaabayaa waxbarashada iskudhafan ee iskuulada lagu qaadanayo bisha Abriil 1deeda iyo 2deeda. Iskuulkiina ayaan idinla soo xiriiri doono si uu idiin siiyo macluumaad dheeraad oo ku saabsan jadwalka Abriil 1deeda iyo 2deeda.
- **Ardayda fsalada 2 ilaa 5 waxa waxbarashadoodii ku qaadan doonaa qaabka online ah iyaga oo guryaha jooga bisha Maarso 29keeda ilaa Abriil 2deeda,** ka dib waxa ay bilaabi waxbarashada iskudhafan ee iskuulada lagu qaadanayo oo la qoodeeyey inay bilaabanto bisha Abriil 5teeda.

Waa idin la soo xiriiri doona mar labaad sida ugu degdeg badan anaka idiin diyaariniyey agabyo dheeraad sidii aad diyaar ugu noqon lahaydeen idinka iyo ardaydiinu inta ka hadhay sanad-dugsiyeedka. Waxaad sidoo kale booqon kartaa shabakadayada [Shabakada Dib U Furista PPS](#) wuxuu warar cusub ee muhiim iyo macluumaadka ku saabsan dib u furista iskuulada.

Mahadsanidin.